**Qodobka 67 (Talaabooyinka Xadhigga)**

Xubin kasta oo dareenta ama ogaata Xubin ka hooseeysa inay gashay gef-asluubeed, waxa u banaan in xubinta geftay uu xidho, waxaana waajib ku ah inuu muddo caqli-gal ah oo dib u dhac lahayn qaado dacwadda ama uu horgeeyo xubin kale oo u leh awooda qaadista dacwadda. Xubinta Sare waxay amri kartaa in gefaha asluubta lagu xidho meel arrintaas loogu talogalay.

**Qodobka 68 (Mushaharka oo laga jaraayo daynta. Magdhowga khasaaraha iyo waxyeelooyinka)**

Iyadoo aan waxba loo dhimayn wixii ku xusan sharci kale, xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Boliiska ee iibiya, Rahma, dayaca iskii iskaga qaata, si ula kac ah ama kama ah, waxyeelo u geysta Hub, Rasaas, Dhar, Qalab, ama hanti kale oo dawladdu leedahay oo uu masuul ka ahaa, waxaa laga doonayaa inuu bixiyo Magdhow la xidhiidha wax uu bi'iyey; waxaana laga jarayaa Mushaharkiisa ama hanti kale oo uu dawladda ku leeyahay dhammaan ama qayb qiimihii hantida ee uu ku gashiyoobay (Daymoobay).

**Qodobka 69aad. (GANAAXU WUXUU KA GO'AYAA MUSHAHARKA)**

Ganaax (Takhsiir) kasta oo la saaro Xubin Ciidanka ka tirsan, Gef Asluubeed awgeed, waxaa laga jarayaa Mushaharkiisa Bileed iyadoo markaas xukunka gefka lagu muujinaayo Qadarka (Tirada) lacagta ee mar kasta laga jaraayo.

**Qaybta 9aad (A w o o d a h a & H a b k a )**

**Qodobka 70 (Awooda)**

Xubin kasta oo Ciidanka ka tirsan waxay awood u leedahay baadhista Gefefka asluubta ee uu ku kaco xubin ka derejo hooseeyaa. Xubin kasta oo Madax ka ah fadhi ama kusime ah, waxay awood u leedahay baadhista gefafka asluubeed ee ku xusan Xeernidaamiyahan ee uu ku kaco xubin uu Taliye u yahay.

**Qodobka 71 (Qaabka dhagaysiga dacwadaha gefefka asluubta)**

Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka oo qaadaysa gef asluubeed, waa inay u sheegto Gefaha arrimaha lagu soo eedeeyey isla markaana dhageysato difaaciisa. Markay dacwaddu dhammaato waa inuu sameeyaa go'aan Ooraal ah. Haddii xubinta dacwadda qaadaysaa u cadaato in gefuhu dembiga galay, waa inuu ku qaado ciqaabta u dhiganta gefkiisa haddii uu awood u leeyahay. Haddii kale waa inuu u gudbiyo dacwadda isagoo talooyinkiisa raacinaaya marinayana jaranjarada toosan ee Madaxda ka sareysa ee awood u leh.

2. Haddii gefaha ku cadaado gefku, faah-faahinta la xidhiidha dhammaadka dhegeysiga dacwadda oo ay la socoto faahfaahinta sababaynta Xukunka iyo Ciqaabta, waa in loo sheego Xubinta geftay. Go'aanka dacwadda waa in loo gudbiyo Taliyaha Ciidanka ama Duqa Magaalada kaasoo dersi doona isla markaasna ansaxin kara oo amri doona in ciqaabta lagu soo saaro codka Ciidanka. Galkiisana loo geliyo.

Qodobka 72 (Awooda Taliyaha Ciidanka ee la xidhiidha wax ka bedelidda Ciqaabta)

Haddii Taliyaha Ciidanka ama Duqa Magaaladu ay la noqoto in ciqaabta Gefaha la saaray u dhigmin Culeyska iyo Xaaladaha ku gedaaman, waa baabi'in karaa, beddeli karaa ama wuxuu amri karaa in dacwadda dib loo baadho.
Qaadista dacwadaha asluubta waxaa loo raacayaa Xeerka habka ciqaabta intuu kala socon karo.

Qaybta 10aad (Gefefka Asluubeed)

Qodobka 73 (Gefafka)

Hoos waxaa ku xusan gefafka asluubta ee lagu qaadi karo xubnaha ka tirsan Ciidanka Boliiska:-

1. Qadarin la'aan xubin ka derejo sareysa oo lagu muujiyo hadal, fal ama saansaan (Dhaqan);

2. Si ula kac ah kaga taga, daahiya ama fulinwaaya markiiba amar uu bixiyey xubin ka sareysa, haddii aanu amarkaasi ahayn mid si cad uga soo horjeeda sharciga;

3. Diida inuu u hoggaansamo ama adeeco amar xaq ah;

4. Salaami-waaya xubin ka derejo sarreysa;

5. Iyadoo aanay jirin sabab la xidhiidha shaqadiisa taga amaba iska jooga meel aan u qalmin sharafta labiska ciidanka;

6. Seexda isagoo shaqo haya;

7. Sigaar caba, muujiya maraadnimo ama iska sheekaysta isagoo haya shaqada ilaalinta taagan ama Gaafmeerka, ama ciyaarsiis ku jira isagoo lebisan;

8. Soo sheegi waaya meeshuu ku sugnaa muddo ka yar afartan iyo sideed saac amaba muddo uga maqnaada fadhigiisa ama meeshii laga doonaayey iyadoo aanay jirin sabab caqligal ahi;

9. Iskaga taga shaqada ilaalinta Gaafmeerka, goobtii shaqada amaba beddela meeshii shaqada looga xilsaaray, isagoon hayn ogolaansho ama aanay jirin sabab lagu qanci karo;

10. U dhaqma isagoo shaqo haya si asluub xun ama taxadar la'aan ah;

11. Dayaca naftiisa, dharkiisa ama hubkiisa uu masuulka ka yahay;

12. U dhaqma si aan hagaagsanayn, asluub toosan aan ahayn amaba uu dagaal ka muuqdo;

13. Fulinwaaya amar la siiyey isagoo haya shaqada ilaalinta (Sentry, beat and Patrol);

14. Madaxdiisa u soo sheegı waaya bukaan, cudur ama xanuun la kala qaado amaba la yimaada sagsaag iyo sheegasho xanuun been ah;

15. Isagoo buka qaadan waaya daawada loo qoray;

16. Iyadoo aanay jirin sabab caqli gal ah ka taga ama samayn waaya warbixin laga doonaayey;

17. Ka taga ama samayn waaya inuu waraaqaha rasmiga ah (Official Document) geliyo xasuus qoraalka looga baahnaa;

18. Sameeya warbixin ama caddayn been ah oo ku qora Waraaqaha rasmiga ah(Official document) isagoo og ama haya sababo caqli gal ah oo uu ku rumaysan karo inay arrintu been tahay;

19. Is-hortaaga ama daahiya inuu sameeyo amagudbiyo dacwad ku lid ah xubin kale oo Boliiska ka tirsan;

20. Dacwad been ah ka sameeya xubin kale isagoo og inay been tahay;

21. Isagoo samaynaya dacwad lid ku ah xubin kale ama bixiya caddayn uu og yahay inay been tahay;

22. Ku kaca, kaalmo ka geysta amaba ku darsama samaynta dacwad ama Qoridda waraad aan la garanayn cidda qortay;

23. Iyadoo aanay jirin sabab macquul ah dayn ka gala ama ka qaata Ciidanka dhexdiisa ama debadiisa, isagoo aan doonayn ama muujin dadaal uu iskaga bixiyo.

24. Dayn ka qaata xubin ka derejo hooseeya.

25. Khamaar, ogolaada ama is-hortaagi waaya in lagu khamaaro meel Saldhig, Fadhi ama xero Ciidan ah;

26. Warbixin tafatiran oo dhab ah ka bixin waaya dhaqaalihiisa gaar ahaaneed marka sidaas laga doono;

27. Isagoo aan amar u haysan qabta shaqo ka baxsan midda loo ogyahay ee caadiga, haba jirto in aanu lacagba ka qaadan;

28. Gashada ama lebısta dhar cad (Civilian clothes) iyadoo laga doonaayey inuu gashanaado lebiska ciidanka;

29. Isagoo fasax ku jira tegi waaya sida ugu dhaqso badan saldhigga ugu dhow;

30. Ku daaha fasaxa la siiyey iyadoo aanay jirin sabab caqli gal ah;

31. Dayaca ama feejiga carro muujiya isagoo tababar ku jira ama si xun u dhaqma isagoo ku jira Ciyaarsiis;

32. la dagaalama xubin kale oo la derejo ah amaba muujiya qaab keeni kara dagaal;

33. Si xun oo asluubta ka baxsan ula dhaqma xubno ka tirsan dadweynaha;

34. Tallaabo haboon ka qaadi waaya xubin ka derejo hooseysa oo gashay gef-asluubeed;

35. Siin waaya taba-bar hagaagsan Ciidanka ka hooseeya;

36. Shaqadiisa si haboon u fulin waaya isagoo muujinaya cabsi u keenaysa halis;

37. Meel fagaaraha ku muujiyo sakhraanimo amaba hawshiisa fulin kari waaya Sakhrad awgeed;

38. Diida ama fulin waaya shuruudaha xadhigga amaba ka taga qoobtii uu ku xidhnaa isagoo aan haysah wax amar ah;

39. Iyadoo aan waxba loo dhimayn Qodobka Xeerka Ciqaabta iyo Xeerka Ciidamada u hanjaba, caaya amaba wax u dhima sharafta xubin ka derejo sarreysa;

40. U hanjaba ama si badheedh ah u caaya xubin ka derejo hooseysa;

41. Diida qabashada iyo kaxaynta xubin la darejo ah ama mid ka derejo hooseysa oo ay waajib ku tahay inuu qabto ama kaxeeyo;

42. Diida oo adeeci waaya amarka ilaaliyaha Taagan (Sentry);

43. U gurman waaya codsi sharci ah oo caqligal ah oo uu u soo jeediyey xubin ka tirsan dadweynaha;

44. U fidin waaya gargaar haboon qof dhaawac ah ama buka oo u baahan gargaar;

45. kula kaca dagaal ama dibindaabyo u geysta qof xidhan oo uu masuul ka yahay;

46. Kaalmo ka nagrada xubin qabasho samaynaysa ama kaxaynaysa qof dembi galay;

47. Iyadoo aan waxba loo dhimayn ciqaabaha ku xusan Xeerka Ciqaabta si haboon u ilaalin waaya qof xidhan ama lagu aaminay;

48. Xubnaha ka derejo sareeya u soo sheegi waaya meeshuu ku sugan yahay qof la baadigoobaayo amaba soo qaban waaya;

49. Sameeya ama ku caddaato inuu kula kacay dagaal iyo qas awoodda Garsoorka (Maxkamad) ama intay socoto qaadista gafafka asluubtu;

50. Iyadoo aan waxba loo dhimayn Xeerka Ciqaabta, qaata, la siiyo, ogolaada abaalmarin ama tixgelin manfaceed isagoo aan sidaas loo amrin oo aanay jirin sabab macquul ah;

51. Rida rasaas amar la'aan ama sabab la'aan'

52. Ku hadla ama ku qaab xumaada kulankii ama haddii kale arbusha;

53. Ku hadla erayo qabiil, urur ama koox siyaasadeed Ciidanka dhexdiisa;

54. Xubin kasta oo la timaada fal ka dhan ah ama ka tagta nidaamka haboon iyo asluubta Ciidanka ee aan markaas si cad loogu soo xusin xubnaha qodobkan; iyadoo la raacayo habka ku xusan xeernidaamiyahan xubin kasta oo la timaada gef asluubeed waa la xidhi karaa, arrintiisa la baadhi karaa, waana la ciqaabi karaa iyadoo loo eegaayo culeyska iyo nooca gefka;

### <u>Qaybta 11aad (Ciqaabaha & Racfaanka)</u>

### <u>Qodobka 74 (Ciqaabaha)</u>

Ciqaabaha soo socda ayaa xubnaha lagu qaadi karaa:-

1. Canaan afka ah (verbal reprimand) oo derejo kasta oo xubnaha loo jeedin karo.

2. Canaan qoraal ah oo derejo kasta oo xubnaha ka mid ah loo jeedin karo.

3. Ganaax lacageed (Takhsiir) (Fine).

   B. Mushaharka oo keli ah laga jaro wax aan ka badnayn 1/4 (Afar meelood meel) Saraakiisha iyo kormeerayaasha.

   T. Wax aan ka badnayn 1/5 (Shan meelood meel) S/Alifle ilaa L/Alifle.

   J Wax aan ka badnayn 1/6 (Lix meelood meel) Alifle ilaa Askari.